



electoral registration form inside

waxaa gudaha ku jira foomka diiwaangelinta codbixiyayaasha

isu diiwaangeli in aad  
**codbixiso**

register to **vote**



The  
Electoral  
Commission



## Waa maxay diiwaanka codbixiyayaasha (electoral register)?

Diiwaanka codbixiyayaasha waa liiska qof kasta oo u diiwaangashan in uu codbixiyo. Si aad doorashooyinka uga codbixiso waa in aad diiwaanka ku jirtaa. Si toos ah (otomaatik ah) laguuma diiwaan gelinayo, xataa haddii aad bixisid Canshuurta Degmada (Council Tax).

Waxaad is diiwaangelin kartaa in aad codbixiso waqti kasta. Haddii aadan diiwaan gashaneyn, haddii aad guurtey amaba magacaagu uu isbedeley, buuxi foomka warqaddan ku lifaaqan.

Waxaa jira laba nooc oo diiwaanka ah – nooca **buuxa** iyo nooca wax laga **badbadeley**. Tafaasiishaadu waxaa ay ku soo bixi doontaa nooca buuxa ee diiwaanka, balse waxaad kala dooran kartaa in ay tafaasiishaadu ku soo baxdo diiwaanka wax laga badbadeley iyo in kale. Diiwaanka buuxa waxaa loo adeegsadaa doorashooyinka, ka hortagga amaba baaritaanka denbiyada, iyo ayagoo baaraya codsiyada deymaha. Diiwaanka wax laga badbadeley waxaa uu u yaalla in la iibsado waxaana loo adeegsan karaa howlaha ganacsiga sida suuqgeynta.

## What is the electoral register?

The electoral register is the list of everyone who is registered to vote. You must be on the register to vote at elections. You are not automatically registered, even if you pay Council Tax.

You can register to vote at any time. If you're not registered, if you've moved or if your name has changed, fill in the attached form.

There are two versions of the register – the **full** version and the **edited** version. Your details will appear on the full version of the register, but you can choose whether or not your details appear on the edited register. The full register is used for elections, preventing and detecting crime, and checking applications for credit. The edited register is available for general sale and can be used for commercial activities such as marketing.



## Kuma ayaa isu diiwaan gelin kara in uu codeeyo?

- Qof kasta oo 16 sano jir ah amaba ka weyn (balse ma aad codbixin kartid ilaa laga gaaro dhalashadaada sanadka 18aad).
- Muwaadiniinta Britain amaba wadamada Barwaaqa Sooranka ah.
- Muwaadiniinta Jamhuuriyadda Irland amaba kuwa wadamada kale ee Isutagga reer Yurub (EU).

Muwaadiniinta wadamada Isutagga reer Yurub oo aan ka aheyn wadanka UK amaba Jamhuuriyadda Irland kaba ay codbixin karaan doorashooyinka Baarlamaanka qaranka ee Westminster, waana in ay buuxiyaan foom ka duwan si ay uga codbixiyaan doorashooyinka baarlamaanka reer Yurub.

## Sidee baan isugu diiwaan geliyaa in aan codbixiyo?

1. Buuxi foomka waraaqdan ku lifaaqan.
2. Hubso in aad **adiga** saxiixdid 'bayaanka'.
3. Foomka ku soo celi xafiiska xaafadaada ee diiwaangelinta codbixiyayaasha.
4. Isu diiwaangeli sida ugu dhakhsaha badan. Waxaa suurtagal ah in ad ka daahdid marka lagu dhawaaqo doorashooyinka ayadoo ay dhici karto in ay qaadato mudo le'eg ilaa iyo todoba todobaad si tafaasiishaada loogu daro.

## Who can register to vote?

- Anyone 16 or over (but you cannot vote until your 18th birthday).
- British or Commonwealth citizens.
- Citizens of the Irish Republic or other European Union (EU) countries.

Citizens of EU countries other than the UK or Irish Republic cannot vote in Westminster parliamentary elections, and must fill in a separate form to vote in European parliamentary elections.

## How do I register to vote?

1. Fill in the form attached to this leaflet.
2. Make sure **you** sign the 'declaration'.
3. Return the form to your local electoral registration office.
4. Register as soon as you can. It may be too late once an election has been announced as it may take up to seven weeks to add your details.

## Macluumaad dheeraad ah

Haddii aad ku nooshahay England iyo Wales, la soo xiriir xafiiska diiwaangelinta codbixiyayaasha (electoral registration office) ee ku yaalla xaafadaada (local council). Haddii aad ku nooshahay Scotland, la soo xiriir sarkaalkaaaga diiwaangelinta codbixiyayaasha (electoral registration officer).

Waraaqdani ma ay khuseyso Northern Ireland. Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir Xafiiska Codbixiyayaasha ee Northern Ireland (Electoral Office for Northern Ireland) ee cinwaankeedu yahay [www.electoralofficeni.gov.uk](http://www.electoralofficeni.gov.uk).

## Qaabab kale

Waxaad waraaqdani ku heli kartaa ayadoo cajalado ku duuban, ayadoo ku qoran Luqadda Gacan Tilmaanta ah ee British-ka oo fiidiyoow ah, ayadoo ku qoran farta dadka aan wax arag, iyadoo daabacaadda waaweyn ah iyo weliba ayadoo ku qorran luqado badan waxaadna ka heli kartaa xafiiska diiwaangelinta codbixiyayaasha ee xaafadaada.

## Soo booqo

[www.rollingregistration.co.uk](http://www.rollingregistration.co.uk) iyo  
[www.postalvotes.co.uk](http://www.postalvotes.co.uk)

## More information

If you live in England and Wales, contact the electoral registration office at your local council. If you live in Scotland, contact your electoral registration officer.

This leaflet does not apply in Northern Ireland. Contact the Electoral Office for Northern Ireland at [www.electoralofficeni.gov.uk](http://www.electoralofficeni.gov.uk) for more information.

## Other formats

You can get this leaflet on audiotape, on a British Sign Language video, in Braille, in large print and in various languages from your electoral registration office.

## Visit

[www.rollingregistration.co.uk](http://www.rollingregistration.co.uk) and  
[www.postalvotes.co.uk](http://www.postalvotes.co.uk)



